# HAGAHA BILAABIDA DEGDEGGA AH EE BARTA KC SCRIPT: GELITAANKA/HELITAANKA ALAABTA LA IIBIYEY

Hagaha bilowga ee degdega ah wuxuu ku tusi doonaa sida loo galo/helo dukumeentiyadaada, dhegaysiyada, iyo alaabta kale ee aad iibsatay.

Fiiro gaar ah: Si aad sidaas u sameyso, waa in aad ku jirtaa Barta Akoonkaaga.

1. Guji falaarta hoos u jeeda ee ku xigta My Account (Akoonkayga), kadibna guji My Record Requests (Codsiyada Diiwaanadayda).




2. Guji badhanka Search (Raadinta).




3. Guji linkiga buluuga ah ee shayada aad rabto inaad gasho/hesho.



4. Xusuusnow taariikhda ah ilaa inta aad heli karto alaabtaada.




Fiiro gaar ah: Si aad ugu laabato liiska codsiyada diiwaanadaada, waxaad gujin kartaa badhanka My Record Requests (Codsiyada Diiwaanadayda).

Si aad u aragto rasiidhyadaada wax kala iibsiga, waxaad gujin kartaa badhanka My Payments (Lacag-bixintayda).




U gudub mid ka mid ah qaybaha hoose taas oo u dhiganta alaabta aad rabto inaad gasho/hesho:

- Documents (Dukumentiyada)
- Recordings of Hearings (Diiwaanada Dhageysiyada)
- Documents Issued by the Clerk (Dukumentiyada uu Soo Saaray Karaanigga)
- Results of Research Requests (Natiijooyinka Codsiyada Raadinada)

## Helitaanka Dukumentiyada la Iibsaday

1. Si aad u gasho/hesho inta badan dukumeentiyada, qeybta Documents (dukumentiyada), guji astaanta buluuga ah ee View Record (Muuji Diiwanka) ee ku ag yaala dukumeentiga aad rabto inaad furto.

Dukumeentigaagu wuxuu ku furmi doonaa bog cusub oo baraawarsarka ah.




2. Dukumeentiyada qaarkood waxaa lagu geyn doonaa ShareFile. Dukumeentiyadaas oo kale, waxaad sharraxaadda ku arki doontaa qeybta Order Summary Information (Macluumaadka Kooban ee Amarka).

Guji linkiga buluuga ah HERE (HALKAAN) si aad dukumeentigaaga uga hesho ShareFile.



## Helitaanka/Gelitaanka Diiwaanada Dhageysiyada La Iibsaday

1. Dhammaan duubitaanada dhageysiyada waxaa lagu gudbin doonaa ShareFile. Waxaad sharaxaad ku arki doontaa qeynta Qollaalka.

Iimaylkaaga ka fiiri linkiga si aad duubitaanadaada uga gasho/hesho ShareFile.




## Helitaanka/Gelitaanka Dukumentiyada La Iibsaday ee Ay Soo Saaray Karaanniga

1. Qeybta Other Documents (Dukumentiyada Kale), guji astaanta buluuga ah ee View Record (Muuji Diiwanka) ee ku ag yaala dukumeentiga aad rabto inaad furto.

Dukumeentigaagu wuxuu ku furmi doonaa bog cusub oo baraawarsarka ah.



## Helitaanka/Gelitaanka Natiijooyinka Codsiyada Raadinada

1. Qeybta Research (Raadinta), guji badhanka View Results (Muuji Natiijooyinka).




2. Shaashada soo furmaysa/muuqanaysa, waxaad ku arki doontaa sharraxaadda waxa ay shaqaalaha Xafiiska Karaaniga ka heleen raadintooda.

Haddii shaqaalaha ay ku siiyeen lambarka kiiska, waxaad u isticmaali kartaa inaad ku codsato diiwaannada kiiska.

Haddii shaqaalaha awoodi waayeen inay helaan lambarka kiiska, waxaad riixi kartaa linkiga buluugga ah ee HALKAN si aad u sii waddo raadinta.

